# Sahan maxalli ah oo ku saabsan amniga - 2025

Laga bilaabo dhammaadka bisha Nofeembar ilaa iyo dhammaadka Janaayo 2026, ku dhowaad 200 000 oo qof oo ku nool Oslo, Asker iyo Bærum ayaa heli doona martiqaad ku saabsan ka jawaabista Sahan maxalli ah oo ku saabsan amniga.

Sahanka waxaa sameynaya shirkadda Verian iyadoo wakiil ka ah booliska Oslo, waxaanna casuumada ka qaybgalka sahanka loo dirayaa dad badan oo ka mid ah dadka deggan Oslo, Asker iyo Bærum.

"Annaga waxaa noo muhiim u ah inaan ogaanno aragtida iyo dareenka dadku ka qabaan amniga goobaha dadweynaha ee deegaanka ay deggan yihiin isla markaana ay maalin walba maraan. Waxaan rajaynaynaa inaan helno jawaabo badan si aan u helno xog nagu filan oo noo fududaysa inaan shaqadayada u qabanno sida ugu habboon," ayay tiri taliyaha booliska Ida Melbo Øystese.

Waa markii labaad ee booliska Oslo samaynayo sahanka maxalliga ah ee amniga. Markii ugu horreysay waxay ahayd sanadkii 2023.

- Natiijooyinkii ka soo baxay sahankii 2023 ayaa noo ahaa aasaas fiican oo aan ku bilaabno tallaabooyin gaar ah oo loogu talagalay meelaha mudnaanta leh ah. Natiijooyinka sahankan cusub ayaa muhiim u noqon doona qorsheynta hawlaha aan ka qaban doonno Oslo, Asker iyo Bærum sanadaha soo socda," ayay sheegtay Øystese.

Sanadkan waxaa cusub in sahanka lagaga qaybgeli karo afar luqadood: **af Noorwiiji**, **Ingiriisi, Carabi iyo Soomaali**.

Sahanku waxa uu ka kooban yahay su'aalo la xiriira mowduucyada hoos ku qoran:

- Dareenkaaga amni ee deegaankaaga
- Dembiyada aad la kulantay ama aad aragtay
- Helitaanka iyo soo jawaabista booliiska
- Kalsoonida aad ku qabto booliiska

Ka qaybgalka sahanku gabi ahaanba waa ikhtiyaari. Waad ku mahadsan tahay waqtigaaga iyo jawaabta aad na siiso!

**Macluumaad ku saabsan sahanka maxalliga ah ee amniga 2025**

Sahankan waxaa fulinaya shirkadda Verian iyada oo wakiil ka ah booliska Oslo. Dhammaan dadka la casuumay si nasiib ah ayaa looga soo xulay Diiwaanka Dadweynaha (Folkeregisteret), waxaana casuumada loogu soo dirayaa iimayl iyo farriin SMS ah. Sahanka waxaa loo dirayaa qiyaastii 180 000 qof oo deggan Oslo, Asker iyo Bærum.

Iimaylka cinwaankiisu (subject) waa **" Sahan maxalli ah oo ku saabsan amniga - 2025"** waxaana laga soo dirayaa iimayl-yada kala ah: undersokelse@verian.no; undersokelse@veriansurveys.no; undersokelse@norskgallup.no

Farriinta waxaa laga soo diraa dhowr cinwaan oo iimayl ah si looga fogaado in adeeg-bixiyeyaasha iimaylku ay fariinta ka dhigaan nooca aan la rabin (spam).

OVERSATT AV TRANSLATED BY TOLKEBIETT AS TEL: +47 22 99 32 99

Ka qaybgalka sahanka amniga ee booliska Oslo waa ikhtiyaari. Macluumaadkaaga waxaa loo maamulayaa si qarsoodi ah. Haddii aad go'aansato inaad ka qaybqaadato, waxaad xaq u leedahay inaad ka baxdo sahanka wakhti kasta.  Adiga ayaa dooranaya inaad ka jawaabto dhammaan su'aalaha ku jira sahanka ama qaarkood oo keliya. Wax dhibaato ah kuma soo gaarayso haddii aadan rabin inaad ka qaybqaadato ama aad marka dambe go'aansato inaad ka baxdo. Haddii aadan doonayn in mar dambe lagugu daro sahanka, dhammaan xogta adiga kugu saabsan waxaa laga dhigi doonaa kuwo aan lagugu garan karin. Haddii aad doorato inaadan ka qaybqaadan, waa la tirtiri doonaa dhammaan macluumaadka aanu kaa hayno.

Faahfaahin ku saabsan ilaalinta xogta qofka iyo xuquuqdaada marka aad ka qaybqaadanayso sahanno uu qabanayo boolisku waxaad ka akhrisan kartaa halkan:. https://www.politiet.no/personvernerklaring/#behandling-av-personopplysninger-i-politiets-innbyggerundersokelse-button

Waxaad sahanka kaga qaybqaadanaysaa adigoo buuxinaya foom elektaroonik ah (su'aalo onlayn ah). Foomku waxa uu ka kooban yahay su'aalo ku saabsan: sida aad u dareento amni, in aad hore laguu geystay faldembiyeed, helitaanka iyo soo jawaabista booliiska, iyo kalsoonida aad ku qabto booliiska. Ugu dambayn waxaa lagu weydiinayaa su'aalo kooban oo asalkaaga ku saabsan.

Waxaan ku xusuusinaynaa in boolisku **marnaba** kaa dalban doonin in aad bixiso xog shakhsi oo xasaasi ah ama BankID iyadoo lagaala soo xiriirayo link/ciwaan, taleefon ama iimayl.

OVERSATT AV
TRANSLATED BY
TOLKENETT AS
TEL: +47 22 99 32 99